

# Waxaa hadda la gaaray wakhtigii iskuulka la dooran lahaa xilli dugsiyeedka deyrta ee 2024

Tani waxay qusaysaa adiga haysta ilmo kaas oo

- bilaabi doona fasalka ebraad (far baradka)
- bilaabi doona fasalka toddobaad
- waxaa maantay fasallada saddexaad leh iskuullada soo socda: Hovhultsskolan F-3, Ljungkileskolan F-3, Sandersdalsskolan F-3 iyo Källdalsskolan F-3.



Codsigu wuxuu furan yahay 31 jenawari illaa iyo 15 feberwari 2024

Bisha maarso 2024 waxaad heli doontaa go'aanka ku saabsan iskuulka ilmuhu dhigan doono

## Waa muhiim inaad codsatid

- ⇒ Haddii waalid ahaan aadan codsi soo gudbin wuxuu ilmahaagu boos ka helayaa iskuul guriga u dhow oo boos ka bannaan yahay.
- ⇒ Haddii aad tihin labo waalid waa muhiim in labada waalidba ay oggolaadaan codsiga si uu ansax u noqdo.
- ⇒ Waa muhiim inaad dhowr iskuul codsatid, oo aad u kala horraysiid sidaad u kala codsatay, si kor loogu qaado fursadda ilmuhu ku bilaabayo iskuulka loo codsaday.

## Xeerar cusub

Guddiga carruurta iyo waxbarashada wuxuu go'aan ku gaaray shuruuc cusub oo quseeya iskuul ka qoridda oo ka baxsan shuruucda ku cad sharciga iskuulka.

Shuruucda quseeya qaadashada ardayda ee degmada Uddevalla waxaad ka akhrin kartaa bogga internetka ee degmada. Waxaad halkaan sidoo kale ka akhrin kartaa sida waalid ahaan aad u codsan kartid iskuulka ilmahaagu dhiganayo.



## Ma qabtaa su'aalo?

Kasii akhri [uddevalla.se/onskaskola](https://uddevalla.se/onskaskola)  
Booqo, wac (garaac), ama emayl u dir xarunta xiiriirka  
Barta kulan ee Dalaberg ayaa sidoo kale ka jawaabi karta  
su'aalahaaga

